

Dib u Celiska Canshuurta Minnesota ee Carruurta Waaweyn ee Uqalma:Caawinta qoysaska iyo carruurta!



Dib u Celiska canshuurta Carruurta Waaweyn ee U Qalma wuxuu keenayaa dhimista cashuurta dadka leh carruur. Canshuur dhaafida wuxuu yareyn karaa cashuurta lagugu leeyahay wuxuuna ku siin karaa lacag celin.

Ma u qalmaa Canshuurta Dib u Celinta ee U Qalanta Carruurta Waaweyn?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Canshuur celiska Carruurta ee Waaweyn ee u Qalmata:

- Waxaad ahayd deggane buuxa ama mid qayb kamid ah sannadka 2024 ee Minnesota (iyadoo qaarkood laga reebayo xubnaha milatariga)
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Waxaad leedahay mid ama in ka badan oo “carruur waaweyn ee u qalma” sida ee qeexayday IRS

Taasi waa imisa?

Canshuur celiska ugu badan waa:

- \$970 oo loogu hal carruur weyn oo u qalma
- \$2,210 oo loogu laba carruur waaweyn oo u qalma
- \$2,630 oo loogu saddex carruur waaweyn oo u qalma

Canshuurta dib u celisku wuxuu ka baxayaa haddii dakhligaagu ka badan yahay \$31,090 dadka shaqsiya ah ee faylka canshuurta buuxiya iyo \$36,880 dadka is qaba ee faylka canshuurta wadajirka ah buuxiya.

Sideen U Codsan Karaa?

Dalbo dib ucelinta Canshuurta Carruurta adiga oo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Dib ucelinta canshuurta Carruurta iyo Qoysaska Shaqaalaha ee Minnesota.*

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo lacag la'aan ah! Booqo www.revenue.state.mn.us oo gal diyaarinta canshuurta la'aanta, fiiri sanduuqa Raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta lacag la'aan ah oo kuu dhow.

